

Sida aad u Wacayso Mid ka Mid ah Adeegyadayaada adigoo Isticmaalaya Afceliye



Wac:
0800 004 2000



Xiriiriyaha telefoonka ayaa ku weydiin doona in aad samayso **Press *** (star) si aad u sii waddo



Ka dib **riix 1** si aad u gaarto adeegyadayaada



Xiriiriyaha telefoonka ayaa ku weydiin doona in aad geliso Lambarkaaga Sirta ah ee Bukaanka (Patient Pin Number) ee 6 god leh.
Kani waa **182987**

Ka dib waxaa lagu weydiinayaa in aad geliso koodka ama lambarka luqadda ee 3 god leh:


Soomaali 058



Waxaa afceliye ama turjumaan laguugu gudbin doonaa waqti ugu yaraan ah **15 ilbiriqsi**



Afceliyaha u sheeg magacaaga iyo lambarka telefoonka aad rabto in aad wacdo, tusaale ahaan 111 (NHS 24)



Afceliyaha ayaa shaqaalaha horta kula hadli doona af Ingiriisi si uu iyaga ugu sheego in aad adigu soo wacayso ka dibna adiga ayuu kuu sheegi doonaa in aad hadalkaaga bilowdo



Shaqaalaha iyo afceliyaha u sheeg marka aad hadalka dhammayso.

Sida aad u Wacayso Mid ka Mid ah Adeegyadayada adigoo Isticmaalaya Abb-ka Afceliyaha



Soo dejiso abb-ka ama barnaamijka moobaylka ee **Capita LiveLINK Client App** oo aad bilaash ugala soo bixi karto dukaanka abb-yada ee telefoonkaaga



Dhex gal adigoo isticmaalaya cinwaanka iimaylka, oo ah **182987@capitalivellink.com**



iyo ereygaaga isgaradka, oo ah **KTE626YGrf**




Waxaad u baahan doontaa oo keliya in aad macluumaadkan ku gasho hal jeer - ma samayn doontid mar walboo aad afceliye u baahato



Guji 'Get Service'



Dooro luqadda aad u baahan tahay




Haddii aad u baahan tahay afceliye ama turjumaan ah jinsi gaar ah, tan ka dooro sanduuqa jinsiga

Waxaa lagu guddin doonaa afceliye



Afceliyaha u sheeg magacaaga iyo lambarka telefoonka aad rabto in aad wacdo, tusaale ahaan 111 (NHS Inform)



Afceliyaha ayaa shaqaalaha horta kula hadli doona af Ingiriisi si uu iyaga ugu sheego **in aad adigu soo wacayso** ka dibna adiga ayuu kuu sheegi doonaa in aad hadalkaaga bilowdo



Shaqaalaha iyo afceliyaha u sheeg marka aad hadalka dhammayso.